



Created by Ben Davis
from Hour Project

Mulkiilaha Guriga Wuxuu iga Xiray Adeegga Guriga!

-
- ❖ Amarka mamnuucaaya guri ka saarida ee Gobalka Washington ayaa dhamaaday Juun 30, 2021. Laakiin difaacyada qaar ee federaalka iyo kuwa gobalka ayay wali helayaan dadka lagu leeyahay kirada aan la bixin cudurka COVID-19 awgiis. Ka akhri isbadalladii ugu danbeeyay ee ku dhaca sharciga barta [WashingtonLawHelp.org/resource/eviction](https://www.WashingtonLawHelp.org/resource/eviction)
-

Inaan akhriyo miyaa tan?

Haa, waa inaad tan akhriso haddii aad ku noooshahy guri kiro ah ee Gobolka Washington. Waa inaad akhriso tan haddii mulkiiluhu kaa xiro adeeggaaga guriga sida korontada si uu isugu dayo inuu kugu khasbo inaad guurto.

Maxaan ka baran doonaa haddaan akhriyo tan?

- Waxa la sameeyo haddii mulkiilaha guriga si sharci darro ah uu kaaga xiro adeeggaaga guriga.
- Halka laga helo caawimaad sharci.

Muxuu sharcigu amrayaa/sheegayaa?

Marka loo eego sharciga gobolka ee [RCW 59.18.300](https://www.wa.gov/courts/1cr/rcw5918300), waa sharci darro in mulkiiluhu si ula kac ah (kas ah) u xiro adeegga guriga looga baahan yahay. Adeegayadaan waxaa ka mid ah biyaha, biyaha kulul, kuleyliyaha, korontada, ama gaaska, marka laga reebo marka si ku meel gaar ah loo dayactirayo.

Si kale haddii loo dhigo, waa sharci darro in mulkiiluhu uu xiro adeeggaaga guriga sida korontada si uu isugu dayo inuu kaa guuriyo guriga.

Waxaad ku dacweyn kartaa mulkiilaha guriga (inta badan Maxkamadda Dacwooyinka Yaryar) magdhow dhan \$ 100 maalin kasta oo adeegga guriga kaa xirnaa. Akhri [Waa maxay Maxkamadda Dacwadaha Yaryar?](#) iyo [Sideen ugu dacweeyaa Maxkamadda Dacwadaha Yaryar?](#)

Mulkiiluhu waligiis si sharci ah ma u xiri karaa adeegga guriga?

Waa laga yaabaa. Haddii heshiiskaaga kirada uu sheegayo inaad adigu bixinayso lacagta adeegga guriga sida korontada, laakiin aadan bixin, shirkadda adeegga ku siiso ayaa kaa xiri karta adeeggaas.

Haddii aad “**ka tagtay**” meesha – oo aad ka guurtay adigoo u sheegin mulkiilaha oo aad joojisay bixinta kirada – mulkiilaha wuu xiri karaa adeegga guriga sida korontada.

Mulkiilaha guriga wuxuu iga xiray adeegga guriga. Maxaan samayn karaa?

Haddii aad si ammaan ah u shidan karto adeegga guriga sida korontada, tusaale inaad dib u rogto damiye-daaraha, waa inaad samaysaa. Haddii mulkiilaha guriga oo kaliya maamulo adeegga guriga, isku day inaad hesho caawimaad sharci isla markaaba. Ka eeg macluumaadka xiriirka halka hoose.

Intaad iskudayeyso inaad hesho caawimaad xagga sharciga ah, waa inaad sidoo kale qortaa oo aad siisaa mulkiilaha warqad ku saabsan dib-u-daarista adeegga guriga sida korontada. Waxaad isticmaali kartaa warqada foomka hoose. Sidoo kale way ku caawinaysaa inaad la xiriirto hay'adda dawladda hoose ee mas'uulka ka ah xeerarka dhismaha. Qaar ka mid ah saraakiisha hirgelinta xeerarka ayaa laga yaabaa inay dib kuugu daaraan adeegga guriga sida korontada.

Haddii aad u baahato caawimaada adeegga guriga, wac 2-1-1 ama ka booqo [websaydhkooda](#) halkaan <https://search.wa211.org/>.

Hel Caawimaad Sharci

Wixii ka baxsan Degmada King: Ka wac Khadka Tooska ah ee CLEAR halkaan 1-888-201-1014 maalmaha shaqada inta u dhexeysa 9:15 subaxnimo - 12:15 galabnimo.



Gudaha Degmada King: Wac 2-1-1 si laguugu gudbiyo bixiyaha adeegyada sharciga maalmaha shaqada inta u dhexeysa 8:00 subaxnimo - 6:00 fiidnimo.

Dadka 60 Jirka Ah ama Ka Weyn waxay ka wici karaan CLEAR*Sr halkaan 1-888-387-7111 (gobolka oo dhan).

Dadka soo wactamaya ee dhagoolada ah, maqalkoodu culus yahay ama hadalka ku adag waxay wici karaan CLEAR ama 211 (ama taleefanka bilaashka ah 1-877-211-9274) iyagoo isticmaalaya adeegga loogu talagalay naafada ee ay doorbidayaan.

Khadka internet-ka ka codso [CLEAR*Online](https://nwjustice.org/get-legal-help) - nwjustice.org/get-legal-help

CLEAR iyo 211 waxaa ku siin doonaan turjubaan bilaash ah.

Daabacaadaan waxay bixinaysaa macluumaad guud oo la xiriira xaquuqaahaaga iyo waajibadka ku saaran. Looguma talogelin in uu bedelo talooyinka sharciyeed ee gaarka ah.

© 2021 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Fasax ayaa loo siiyay inay koobi kala baxaan ayna qaybiyaan Ururka Isbahaysiga Sinaanta Cadaalada iyo shakhsiyaadka u isticmaalaya qaab aan ganacsi ahayn oo kali ah.)

NOTICE REQUESTING RESTORATION OF UTILITIES
(OGAYSIIS LAGU CODSANAYO DIB USOO CELINTA ADEEGYADA GURIGA)

Date: _____

(Taariikhda)

_____ [Landlord's name and address]
(Magaca mulkiilaha guriga iyo cinwaankiisa)

Dear _____:

(Qiimaha leh)

This is to notify you that the rental at _____

_____ which you manage and which I live in needs these utilities restored:

(Tani waa in lagu ogeysiyo in guriga kirada ah _____

_____ oo aad maamusho kaasoo aan ku noolahay uu u baahan yahay in adeegyadaan loo soo celiyo:)

1. _____

2. _____

3. _____

The Washington Residential Landlord Tenant Act requires you to begin to do this within 24 hours to repair the loss of hot or cold water, heat or electricity, or a condition imminently hazardous to life.

(Sharciga Kireystaha iyo Mulkiilayaasha Guryaha Washington ayaa wuxuu kaa doonayaa inaad arrintaan ku howlgasho 24 saac gudahood si aad u dayactirto khasaaraha biyaha kulul ama qabow, kuleyliyaha ama korantada, ama xaalad kasta oo khatar ku noqon karta nolosha.)

If the repairs are not completed within the applicable period of time, I intend to use the remedies provided in the Act.

(Haddii dayactirka lagu dhammayn waayo muddada ku habboon, waxaan ku talo jiraa inaan isticmaalo xalka ku xusan Sharciga.)

If you have turned off these utilities purposely to force me to move, this is also unlawful under RCW 59.18.300 and I may sue for damages for each day that the utilities were off.

(Haddii aad si ula kac ah u damisay adeegyadan si aad iigu khasabto inaan ka baxo guriga, gow taasi sidoo kale waa sharci darro marka loo eego xeerka RCW 59.18.300 waxaana laga yaabaa inaan kugu dacweeyo khasaaraha maalin kasta ee adeegga guriga iga maqnaa.)

Sincerely,

(Si daacadnimo ku jirto,)

Signature

(Saxiixa)

Print Name

(Magaca Daabacan)